# Mas'uuliyadaha iyo Xuquuqaha Ka-qaybgalaha Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda Da'da Weyn

Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeraleyda ee Waayeellada (SFMNP) ayaa wuxuu dadka waayeellada ah ee uu dakhligooda hooseeya siiyaa khudaar iyo miro markaasi la soo gurey (darey ah) iyada oo uu yoolku yahay sii wanaajinta xaaladda caafimaadkooda iyo nafaqada. Wuxuu kaloo taageeraa beerashada degaanka iyadoo la kordhinayo isticmaalka suuqyada beeraleyda iyo miisaska wadadda dhinaceeda la dhigto. Waxaa qayb ahaan lagu maalgeliyay maaliyadda federaalka ee USDA.

## Xuquuqahaaga

**Codsadaha/ka-qaybgalaha barnaamijka SFMNP ahaan waxaad xaq u leedahay:**

- in lagugu la dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh oo aan takoor lahayn;
- in qoraal ahaan lagugu soo ogeysiiyo 15 maalmood gudahooda ee codsiga haddii aanan la go'aamin in aad xaq u leedahay;
- in aad rafcaan ka qaadato go'aanka xaq u yeelasho la'aan haddii aad dareento in go'aaminta si qalad ah loo sameeyay;
- in macluumaadka aad bixisay laga dhigo mid asturan haddii aad codsato in dad lala wadaago mooyaane;
- in aad cabasho soo gudbiso haddii aad dareento in aanan si cadaalad ah laguugu la dhaqmin;
- in aad hesho towjiihin cad oo ah sida iyo halka lagu isticmaalo dheefaha aad hesho;
- in aad oggaato adeegyada kale ee aad heli karto. Waxaad la xiriiri kartaa xarunta Macluumaadka iyo Caawimaadda Dadka Da'da Weyn haddii aad dooneyso in aad wax ka oggaato adeegyada kale ee loogu talagalay dadka da'da ah ee degaankaaga.

## Masuuliyadahaaga

**Codsadaha/ka-qaybgalaha barnaamijka SFMNP ahaan waxaad mas'uul ka tahay:**

- in aad bixiso macluumaadka saxda ah ee aad ogtahay si loo go'aamiyo xaq-u-yeelashada;
- in aad fahamto bixinta macluumaadka been-abuur ah iyo/ama in aad si ula-kac ah u qariso xaqiiqooyinka in ay keeni karto in aad dib-u-bixiso dheefaha ama tallaabo sharci ah in lagaa qaado;
- in aad fahamto iskudayga in dheefaha la qaato hal jeer ka badan ama goobo badan oo laga bixiyo inta lagu guda jiro xilli waxay keeni kartaa in barnaamijka lagaa joojiyo;
- in aad adiga cunto ama isticmaasho waxsoosaarka beeraha ee cusub ee aad barnaamijkan ka heshay;
- in aad dhowrto/ilaaliso dheefaha aad heshay. Fadlan u soo sheeg haddii ay kaa lumaan ama lagaa xado hay'adda dheefahaaga bixisay; kaararka dheefaha ee kaa lumey ama lagaa xadey waxaa kuu beddeli karta hay'adda bixisay;
- si aad wax ugaga iibsato dheefahaaga Beeraley Loo Oggol Yahay inta u dhaxeysa 1-da Juun iyo 31-ka Oktoobar;
- in aad fahamto in maalgelinta barnaamijkan ay xaddidan tahay iyo in loo bixiyo si ku saleysan qofkii ugu hor-yimaada, ayaa marka hore la siinayaa ilaa ay maaliyaddu ka dhammaato.

Waxaa la ii sheegay xuquuqdeyda iyo waajibaadyadeyda ee waafaqsan SFMNP. Waxaan caddeynaya macluumaadka aan u bixiyay go'aaminta xaq-u-yeelashadeyda in ay sax tahay, inta aan ogsoonahay. Foomkan caddeynta waxaa loo soo gudbiyay si waafaqsan helitaanka kaalmada Federaalka. Saraakiisha barnaamijka waxaa ay xaqiijin karaan macluumaadka foomkan ku qoran. Waxaan fahamsanahay in si ula-kac ah loo sameeyo bayaan been ah ama marin-habaabin ah ama si ula-kac ah khalad ahaan loo sheego, loo qariyo, ama in xaqiiqooyinka la hayo waxaa ka dhalan kara bixinta lacagaha hay'adda Dowladda, kaash ah, qiimaha dheefaha cuntada ee sida aan habboonayn la ii siiyay waxayna ii keeni kartaa in la igu soo oogo dacwad madani ama mid dembi oo waafaqsan sharciga Gobolka iyo Federaalka. Jaangooyada xaq-u-yeelashada iyo ka-qaybgalka barnaamijka SFMNP waa kuwo isku si u ah qof walba, iyadoo aan la eegayn isirka, midabka, asal ahaan dalka aad ka soo jeedo, da'da, naafonimada, ama jinsiga
Waxaan fahamsanahay in aan rafcaan ka qaadan karo go'aan kasta ee ay qaadatey hay'adaha maxalliga ah ee ku saabsan xaq-u-yeelashada barnaamijka SFMNP.

Iyadoo la raacayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federaalka iyo siyaasadaha iyo xeernimaadyada xuquuqda madaniga ah Waaxda Beeraha ee Mareykanka, hay'addan waxaa ka mamnuuc ah takoorka ku saleysan isirka, midabka, qofka asal ahaan dalka aad ka soo jeedo, jinsiga (oo ay ku jiraan aqoonsiga lab iyo dheddig iyo dookha galmo), naafonimo, da'da, ama aargoosiga ama aar-gudashada hawlaha xuquuqda madaniga ee hore.
Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado kale oo aanan ahayn Af-Ingiriisi. Shakhsiyaadka naafada ah ee u baahan habab kale oo isgaarsiineed si ay u helaan barnaamij (t.a., Braille, daabacaad weyn, cajalad maqal ah, Luuqadda Meedaarta Mareykanka), waa in ay la xiriiraan gobolka ka mas'uulka ah ama hay'adda maxalliga ah ee maamusha barnaamijka ama Xarunta TARGET ee USDA (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama USDA kala xiriir Adeegyada War-lalinta Federaalka (800) 877-8339.
Si uu u soo gudbiyo cabashada takoorka barnaamijka, Qofka cabashada soo gudbinaya waa in uu buuxiyaa Foomka AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka ee barnaamijka USDA kaas oo laga heli karo barta internet-ka: [https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf](https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf), xafiis kastoo ay USDA leedahay, iyadoo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa in ay ku qoran yihiin magaca qofka cabashada soo gudbinaya, cinwaanka, lambarka telefoonka, iyo sharraxaadda qoraalka ah ee tallaabada takoorka lagu eedeeyay oo si fiican u faahfaahsan si loogu wargeliyo Kaaliyaha Xoghayaha Xuquuqda Madaniga (ASCR) dabciga iyo taariikhda xadgudubka xuquuqaha madaniga ah ee lagu soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu gudbiyaa USDA (1) **boostada:** U.S. Department of Agriculture, Office of the Assistant Secretary for Civil Rights, 1400 Independence Avenue, SW, Washington, D.C. 20250-9410; ama (2) **fakis:** (833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama (3) **email ahaan:** [Program.Intake@usda.gov](mailto:Program.Intake@usda.gov).

Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.